FSNAU
Qaybta Falanqaynta Sugnaanta Cuntada iyo Nafaqada ee Soomaaliya

# Hubinta Cuntada & Nafaqada

La soo Saaray 20[ka] Abriil, 2010

## Warbixinta Gooban ee Saddex Bilooblaha – Saameynta Xilliga Jilaalka, Abriil ' 10.

Cimilada
Suuqyada
Nafaqada
Beeraha
Xoolaha
Colaadda Sokeeye
Arrimaha Gobolladaee Soo Shaacbaxaya
Iskudhafka Falanqaynta Sugnaanta Cunnada

### Qodobada Muhiimka Ah

Xaalada sugnaanta cuntada ee dhamaan habnololeedyada Soomaaliya waxay sii ahaanayaan sidii loogu kala saaray baaristii la sameeyay dabayaaqadii Deyrtii 2009/10 (Jan-Juun). Xilliga jiilaalku waa uu qaboobaa, ka dib roobab aan la filayn oo ka da'ay inta badan habnololeedyada Soomaaliya intii u dhaxaysay bilihii Feebaraayo iyoMaarso. Roobabku waxay hagaajiyeen xaaladda daaqa waxayna yareeyeen biyo xumadii ka jirtay waddanka intiisa badan, marka lagu daro dhulka ay abaaruhu waxyeeleeyeen ee habnololeedyada gobollada Togdheer iyo dhulka banaan ee Sanaag. Si kastaba ha ahaatee, dhulka daaqa iyo biyaha oo yaraaday oo ay keeeneen abaarihii gobollada dhexe waxyeelleeyay ayaa sii xumeeyay ayadoo la eegayn roobabkii **Jarka** ee da'ay intii lagu jiray xilligii Jiilaalka kuwaasoo ahaa kuwa dhexdhexaad ah iyo kuwa kooban, uguna wacan tahay xoolaha oo xaaluf joogto ah ku hayey. Beerha Guga hortiisii ayaa la beeray inta badan Koonfurta ayna u sabab tahay roobabka *Todobka* la helay xilligii jiilaalka oo u dhaxeeyay heerar dhexdhexaad ah iyo kuwo ka sarreeyaba. Hawlaha beeraha marka lagu daro mira goosashada xilliga ka baxsan berashada goballada jubbbooyinkg iyo Guga oo horay wax loo beeray ayaa waxay keentay in ay korodho fursadaha shaqo iyo qiimaaha shaqo maalmeedka. Arrintaasi fiican ee soo korodhay ayaa waxa hareeyey waxoogaa koror oo ku yimi qiimaha badarka dalka laga soo saaray. kaas oo saameyay awoodda wax iibsiga ee dadwenayha meela badan ee Soomaliya ka mid ah. Xaalada sugnaanta cuntada ee qoysaska saboolka magalooyinka gobollada dhexe ayaa sii xumaatay gobolladaiyadoo ugu wacan tahay koror ku yimid karashka ugu yar ee lagu noolaan karo (KYN), hoos udhac ku yimid isa saacididda bulshada dhexdeeda ah iyo colaadaha sokeeye.

**<u>Cimilada</u>**: roobab *Todob* ah oo celceliskoodu u dhexeeyo heerar dhexdhexaad iyo kuwo ka sii sarreeya ayaa ka da'ay meela badan oo koonfurta dalka ah intii lagu jiray dabayaqadii bishii Febraayo iyo horaadkii Maarso. Isla waqtigaas roobab koobkooban oo goos goos ah ayaa ka da'ay goballada dhexe, halka roobab wanaagsan oo marka loo eego baaxaddooda, baahsanaantooda iyo xooggooduba ay ka de'een qayba badan oo dhulka waqooyiga ah. marka laga reebo xoolaleyda Howdka ee dhulka bannaan ee Soolka iyo dooxada Nugaal.

**<u>Colaadaha Sokeeye</u>:** Colaadaha sokeeye ayaa ka sii socda goballada koonfurta iyo kuwa dhexe ee Soomaliya. Rabshaduhuna waxay galaafteen barakicayaal lagu qiyaasay 173,100 oo qof intii lagu jiray xilliga illaa iyo bishii Jannaayo ee 2010. Hawlaha burcad badeedda ayaa iyana ku sii ku sii baahay xagga marakiibta sidda badeecooyinka ganacsi ee ku jihaysan Soomaliya. Howlaha samafalka ayaa hor taagan dhibaatooyin badan oo dhanka gaarista dadka dhibaataysankoonfurta somaliya.


**<u>Beeraha</u>:** Dalag beerasho goor hore ah ee xilliga Guga ayaa ka billabatay inta badan koonfurta somaliya iyadoo diyaarinta iyo beerista dhul-beereedyada ay u dhexeeyaan heerarka caadiga iyo kuwo ka sarreeya. Meelaha beero-xoola dhaqatada ee waqooyiga galbeed, dhul diyaarinta iyo abuurista waxaa loo aqoonsaday in ay ka sarreeyaan heerka celceliska. Qimaha badarka waddanka laga soo saaro ayaa kor u kacay inta badan suuqyada koonfurta Soomaaliya, marka laga reebo gobolka Baay halkasoo uu badarku hoos u dhacay ayadoo ay ugu wacan tahay wax-soosaarkii *Deyrtii* hore oo aad u sarreeyay. Qiimaha masaggada ayaa kordhay gobollada Bartamaha iyo Waqooyi Bari hase yeeshee si aad ah ayuu hoos ugu dhacay Waqooyi galbeed.

**<u>Xoolaha</u>:** Roobabkii dambe ee **Xayska** iyo sidoo kale kuwo xilli roobeedka ka hor ka da'ay waqooyiga waxay hagaajiyeen xaaladda daaqa iyo biyaha meelaha abaaruhu ay si xun u waxyeelleeyeen ee gobollada Togdheer iyo banka Sool iyo Sanaag, sidoo kale meelaha roobabku ku yaraayeen ee waqooyiga Soomaliya. Roobabkii koobnaa ee gobollada Bartamaha iyo Hiiraan kuma fillayn daaqa ayadoo ay uga dartay xaalufin ba'an roobabkoo yaraa awgood. In ka badan nus malyuun neef oo xoola ah ayaa la dhoofiyay waqtigii xogtan ay soo baxaysay. Taas oo tilmamaysa koror gaaraya 17% marka loo eego isla xiliggaan sanadkii hore.

**<u>Suuqyada</u>:** Shilinka Soomaliga ah (SoSh) ayaa wax yar soo xoogaystay ilaa horraantii sanadkan taaso keentay koror dolarka soo geleya dalka ee ka imanaya ganacsiga xoolaha iyo howlaha burcad badeedda. Qiima kororka Shilinka Somaliland (SlSo) waa uu yaraa xilliga xogtan ay soo baxaysay. Qiimaha badeecadaha cuntada dibadaha ka soo dagta waa ay dagganeyd koonfurta, halka qiimaha sonkorta iyo bariiska ay keceen Bartamaha iyo Waqoooyi Bari lakiin qiimaha bariiska ayaa wax yar hoos u dhacay Waqooyi galbeed. Tusmada sicirka iibsahada ayaa kordhay dhamaan meelaha Shilin Soomaaliga laga isticmaalo.

**Nafaqada:** baaritan nafaqo oo dagdag ah oo laga sameeyay inta badan magaloyinka ayaa muujisay waxoogaa ladnaan ah,marka laga reebo magaalooyinka Afgooye, Hargeesa, laasacanood, Ceeldheer, Ceelbardi, Xudur, Balad xaawo iyo Xarardheere. Natiijada hordhaca ee sahanka nafaqada ee beero xoololeyda Deegaannada Togdheer ee la qabtay bishii Maarso, 2010 ayaa muujinaysa xaalad nafaqodarro ***Culus***, taas oo **heerka nafaqa darida guud** ay noqotay **12.2%** iyo **halka heerka nafaqda daran**i ay noqotay **2.3%,** taasoo ah in ay xaaladu soo hagagayso laga so bilabo Gu 2009 oo markaas oo ay xaaladdu ahayd heer khatar ah .

FSNAU - Somalia
United Nations Somalia, Ngecha Road Campus
Box 1230, Village Market, Nairobi, Kenya
Tel: +254-20-4000500
Cell: +254-722-202146 / 733-616881
Fax: +254-20-4000555
Email: info@fsnau.org
Website: www.fsnau.org





Xilli Sanadeedka Soomaaliya iyo Dhacdooyinkii Ugu Muhiimsanaa


cimilada

## WARBIXINTA QAYBAHA

**Khariiradda 1. Isku Darka Roobka (mm), Janaayo - Maarso '10**




**Khariiradda 2. Hal Beegga Cagaarnimada Dhirta (NDVI)ee Tobanka Dambe ee Maarso '10**




### CIMILADA

**Roobabkii Da’ay Xiligii Jilaalka**

Xilligii dhowaa ee jiilaalka (Jannaayo ilaa Maarso) ayaa ahaa mid iska qabow ayadoo ay ugu wacay yihiin roobabkii todobka ee ka da’ay dabayaaqadii bishii Febraayo iyo horraantii Maarso qaybo badan oo konfurta ah, roobabkii **jarka** ee gobollada bartamaha, roobabkii dambe ee xayska iyo roobabka xili la’aanta iska da’ay ee gobollada waqooyiga.

Gobollda waqooyiga, roobab wanaagsan, marka la eego siday baaxaddooda, baahsanaantooda iyo xooggooduba, ayaa laga helay inta badan qaybo kamid ah Golis-Guban, banka Sool iyo qaybo ka mid ah dooxada Nugaal. Taa waxaa dheer roobab wax xoog leh ayaa ka da’ay hab-nololeedyada Karkaar-Dharoor, bariga Golis iyo Gagaab ee gobolka Bari. Inta badan gobollada Awdal, Waqooyi Galbeed iyo Togdheer ayaa waxa ka da’ay roobab aad baahsan u dhexeya heer dhexdhexaad iyo kuwo culus. Sase yeeshee, , roobab aan fiicneyn ayaa laga soo sheegay inta badan dhulka Hawdka iyo qaybo ka mid ah bartamaha Nugaal iyo banka Sool. Horraanttii bishii Maarso daadad wax ba’an ayaa ku dhuftay gobollada Waqooyi Galbeed iyo Awdal taasoo keentay dhimasho xoolo.

Gobollada bartamaha ee Galguduud, Mudug iyo Hiraan roobabku way kala googo’naayeen marka loo eego di’iddooda iyo baahsanaantooda degmooyinka Ceelbuur, Ceeldheer iyo Hobyo ee dhulka digirta ka baxdo iyo xoolodhaqatada Cadduun. Roobab tiix tiix ah ayaa ka da’ay deegaannada miyiga ee dagmooyinka Gaalkacayo, Galdogob, Dhuusomareeb, Caabudwaaq iyo Cadaado. Sikastaba ha ahaate, roobabku waxay u ahaayeen kuwo dhexdhexaad ah qeybo ka tirsan ah xooladhaqatada geelleyda koonfureed ee degmooyinka Baledweyne, Buuloburde iyo Jalalaqsi. Dhulka koonfurta, roobab (todob) u dhexeeya heerar dhexdhexaad ilaa kuwo culus ayaa ka billoywday inay ka da’an dhamadkii Febraayo inta badan gobollada Baay iyo Bakool iyo qaybo kamid ah gobollada Gedo, Shabellooyinka iyo Jubbooyinka. Roobabku ayaa ahaa kuwo ka badan celceliska muddada dheer ee gobolladaas - in ka badan 300% (Khariidada 2).

Waxaa ka duwanaa oo roobabkani aan helin qaybo kamid ah degmooyinka Adan yabaal (Shabeellada Dhexe) iyo Garbahaarey (Gedo) iyo sidoo kale qaybo kamid ah dhul-xeebeedka gobollada Shabeellada hoose iyo Jubooyinka, kuwasoo iska qalalnaa xiligii jilaalka. Si kastaba ha ahaate, roobab dhexdhexaad ah ayaa laga soo sheegay intii lagu jiray toddobaadkii ugu horeyay ee bishii Abriil. Waxaa sare u kacay heerka biyaha ee wabiyada Shabelle iyo Juba horraantii bishii Maarso taasoo ay u wacan tahay roobab dhexdhexaad ah oo ka da’ay dhulka sare ee wabiyada Shabeelle iyo Jubba, lakiin heerka biyo sidka webiyadu ayaa billaabmay inay hoos u dhacaan laga soo billaabo dhamaadkii bishii Maarso. Si kastaba ha ahaate, daadad ayaa ka dhacay qaybo kamid ah Jubbada dhexe (Sakoow, Salagle, iyo Bu’aale) billowgii bishii Maarso kuwasoo baabi’iyay qaybo ka mid ah dalaggii ka dambeeyey xilli beereedka.


**Xaaladda Dhirta**

Tusaha Kala-duwanaanshaha Doogganaanta Dhirta (TDDDH) ee ay soo saaraan Dayax-Gacmeedyada tobankii beri ee ugu dambeyay bisha Maarso wuxuu mujiyay xaalado liita goobaha xoolo-dhaqatada Hawd iyo Cadduun ee gobollada bartamaha iyo waqooyiga (kariiddada 2), taasoo ay keentay dhawr xili oo isku xiga oo roobabku xummaayeen iyo xilligii jiilaalka oo aad u xumaa. Wararka ka imanayay gudaha dalka ayaa muijiyay xaaladaha daaq Golis iyo qaybo ka mid ah Karkaar, banka Sool, Dooxada Nugaal iyo dhulka digirta kabaxdo inay soo hagaagayeen. Hasee yeeshee, xaaladaha dhireed iyo daaqba ee dhulka digirtu ka baxdo (degmooyinka Ceelbuur iyo Ceeldheer) iyo inta badan koonfurta ayaa ah kuwo heer wanaagsan ah. Taasi waxa ka duwan goobaha hab-noleledyada xoolalayda geelleyda koonfureed koonfurta, khaasatan gobalada Hiraan, Bakool, Gedo, Shabeellada hoose iyo Jubbooyinka iyo sidoo kale xeebaha Shabellooyinka iyo Jubbooyinka.

## COLAADAHA SOKEEYE

Colaadaha sokeeye ee daba dheeraaday ee Soomaaliya waxay ku hayaan saamayn xoog leh sugnaanta cuntada iyo hab nololeedyada ee dadka Soomaaliyeed ee miyiga iyo magaalooyinkaba. Goballada bartamaha iyo Muqdisho ayaa wali ah xudunta qalalaasaha, ayadoo ay joogto noqotay dilalka , baabi'in hanti, qalaanqal ganacsi iyo barakac dad aan waxba galabsan.

**Jaantuska 1: Dhaqdhaqaaqa Barakaca Dadka ee Soomaaliya ee 1da Janaayo - 26ka Maarso '10**





Source: Modified from Somalia PMT Monthly Reports, Jan-Mar '10

Arrinta ugu daran ee ay sababeen colaadaha sokeeye ayaa ah baabi'in amaba lumid hab-noleleedyada tiro badan oo dadka reer magaalka ah, khaas ahaan dadka dega Muqdisho iyo gobollada bartamaha. Badanaaba arrintani waxay aad u saamaysay qoysaska saboolka reer-magaalka ka soo cararay guryohoodii oo aan ku haysan tasiilaad nololeed goobaha ay ku soo qaxeen. Hay'adda Qaramada Midoobay ee qaabilsan arrimha qaxootiga iyo dadka barakaca (UNHCR) waxay ku qiyaastay 173,100 oo qof in la barakaciyey laga soo billaabo bishii Janaayo 2010, ayna ugu wacan tahay iska hor imaadyada iyo dagaallada sokeeye. Barakaca ugu wayn waxa uu dhacay bishii Jannaayo markii ay siyaadeen iska horimadyada ka dhacaya Muqdisho iyo dagaalladii si lama filaanka ah uga qarxay gobollada bartamaha. Tirada ugu bada ee barakacayashan (105,000) waxa ay ka qaxeen Muqdisho, halka ay inta kale ka soo qaxeen Gobollada Galgaduud iyo Hiraan. Barakacayasha badankood waxay ku qexeen Muqdisho gudeheeda, gobollada Shabeellada hoose iyo dhexe iyo qaybo kamid ah gobollada Mudug iyo Galguduud (Jaantuska 1).

Ayadoo khilaafku uu aad ugu baahsan yahay magalooyinka, gaar ahaan Muqdisho iyo Bartamaha, waxa kaloo jira iska hor imaadyo ku salaysan dhul, daaq amaba biyo oo ka dhaca badanaaba goobaha miyiga. Tusaale, khilaaf la xiriiray sheegasho dhul iyo biyo ee ka dhacay dagmooyinka Bacaad wayn iyo Amaara ee Xarar dheere ayaa waxay sababeen inay ku dhintaan tiro dad ah (100 qof), xannibaad ku timid isu socodka xoolalayda ee daaqa iyo biyaha, qas ku yimid ganacsigii iyo xanibaadyo ku yimi gaarista suuqyada.

**Jaantuska 2: Joogitaanka Shaqaalaha Qaramada Midoobay iyo Hayadaha Caalamiga ah, Soomaaliya**




Source: UN-OCHA Access Report – Feb '10

Burcad badeednimada ka dhacda xeebaha Soomaaliya ayaa dhibaatooyin ku haysa marakiibta ajnabiga, inkastoo dhacdooyinku qafaalshada maraakiibta ay yaradeen saddexdii bilood oo ugu dambaysay. Hase yeeshee, burcad-badeeddu waxay ay ballaariyeen istaratijyadooda burcadnimo iyagoo bar tilmamsanaya maraakiibta alaabada ganacsi u sidda Soomaliya. Sida la soo sheegayo, tiro weerar burcadnimo oo aan horay u dhicin oo lagu beegsanayo doomaha alaabada sidda ee ka imanaya Imaaraadka Carabta kuna socda koonfurta Soomaaliya bishii la soo dhaafay ayaa keentay cuna-qabateyn ganacsi oo hal toddobaad socotay in lagu soo rogo biyaha somaliya laga bilaabo dhamadkii Maarso ilaa dhamadkii Abriil. (Joornaalka Maalinlaha ee ka soo baxa Immaaraadka Carabta, , caddadkiisi 15th April2010). Bartilmamaysiga doomaha u sida cuntada daruuriga ah ee meelaha cuntadu ku yar tahay ayaa u badan inay raad kuyeelato kor u kaca qiimaha cuntada, taasoo sii xumayn doonta xaaladda sugnaanta cuntada ee Soomaaliya.

Xannibaadaha howlaha bani'aadmino ee ka socda koonfurta iyo qeybo ka mid ah gobollada bartamaha iyo xaaladaha ba'an ee ay ku sugan yihii tiro badan oo barakacayaal ahiyo sidoo kale tiro dadoo ku sugan magaalooyinka iyo miyiga ayaa ah arimmo laga walwalo. Baracayaashu ayaa soo wajahay xaalado cakiran oo la xiriirta cunnada biyaha iyo hoygaba (IASC report, February 10) ayadoo ay ugu wacan tahay samafalka bini'aadminimo ee ku sii daba yaraanaya gobollada koonfurta iyo meelo kamid ah bartamaha. Maqnaanshaha caawimada bani'aadmino ayaa laga yaabaa inay sababto in joogitaanka tirooyinka badan ee baradacayaasha ku sugan gobolladani cawaaqib xun ku yeelato bulshooyinka deggan deegamaadaasayna ka mid yihiin ku tartanka shaqo maalmeedyada, caawinta saboolka hore u degganaa oo yaraata, koror ku yimaada qiimaha maciishadda, iyo waxyeelleyn la xiriirta xagga degaanka, iwm. Ayadoo ay ugu wacan tahay xannibaadaha samafalka bani'aadminimo, , tirada hayj'adaha bani'aadmino iyo shaqaalaha u shaqeeya ayaa si aad ah hoos ugu dhacday ilaa iyo sanadkii hore, iyadoo dhaawacday helitaankii caawimada samafalka bini'aadminimo ee aasaasiga loo baahnaa (Jaantuska 1). Taasi baddalkeed, joogitaanka hay'adaha samafalka ayaa sii kordha gobollada Waqooyiga, taas oo u fasirmaysa koror ku yimid tira guud ee shaqaalaha ajnabiga caalamiga ah ee ka shaqeeya Soomaaliya, oo ahayd 95 qof bishii Diseembar ee 2009 halka tirada shaqaalaha ay gaarta 196 bishii Febraayo ee 2010.

dagaallada sokeeye

beeraha

**BEERAHA.**

**Howlaha kasocda beeraha.**


Warbixintii Taxanaha Farsamo ee Daytii 2009/10, FSNAU waxay saadalisay soo saar dalag galay iyo dalag loo beerto iibka (Sisin iyo Digir) ee xilliga xilli beereedka aan ahay oo ka soo go'aya goballada Jubbooyinka bishii Maarso ee sanadkan. Si loo xaqiijiyo sadaashas, FSNAU waxay ka samaysay daraasad gobollada Jubbooyinka bishii Maarso ee 2010 taas oo ku qiyaastay gallayda ka soo go'day deegaannadaas inay u dhiganto 1,600 oo tan. Soo saarkani ayaa ka hooseeya (6%) boqolkiiba lixsaadaashii hore taas oo u sabab tahay kulal ku yimid cimilada intii lagu jiray bilihii Janaayo iyo Febraayo iyo waxyeellooyin cayaan, iyo daadad kooban oo ka dhaca Jubbada dhexe 7dii bishii Maarso ee sanadkan. Inta badan gallayda soo go'day 1,300 MT ama 81% waxaa laga goostay degmada Jammaame (Jubada Hoose), halka inta kale laga goostay degmooyinka Jilib (75MT), Saakow iyo Buaale (132MT) ee Jubada Dhexe. Sisintu ayaa ahayd dalagga ugu muhiimsan ee soo go'ay xiligan ayadoo lagu qiyaasay 3,200MT, taasoo u dhow saadaashii la sameeyay intii lagu jiray daraasaddii xilligii *Deyrta*. In kabadan laba meeloodoo meel (57%) sisinta soo go'aday xiligan waxa laga sosaray Jammaame, halka inta kale ay kasoo go'aday degmoyinka Jilib (19%), Bu'aale (14%) iyo Saakow (10%). Jammaame waxay ka loo soo saartay 80% (480MT) dalagga digirta ee soo go'ay xilligan, taasoo lagu qiyaasay 600MT in ay ka timid isku darka degmooyinka Jilib, Bu'aale iyo Saakow.

Dabayaaqadii bishii Febraayo illaa bishii Maarso, roobab u dhexeeya kuwo dhexdhexaad ah ilaa kuwo culus ayaa laga helay meelo badan oo dhulka wax laga beero (hab-nololeedyada beero xoolo dhaqatada iyo kuwa wabiga ku nool) ee koonfurta iyo waqooyi galbeed (Awdal, Waqooyi galbeed iyo Togdheer). Roobab khafiif ah ayaa laga soo sheegay Shabeellada dhexe, Shabeellada hoose iyo Jubbada hoose iyo sidoo kale hab-nololeedka beero-xoolo dhaqato ee ay digirta ka baxdo ee gobollada bartamaha. Roobabku waxay ahayeen kuwo mamfac u leh hab-nololeedyada beero-xoolo dhaqatada markii la jilaal duugayay abuurka xilliga Guga, roobabkaaso ku dhiiri geliyay beeralayda koonfurta Soomaaliya inay dadajiyaan diyaarinta dhulka iyo howlaha beeritaanka. Roobabku waxay kaloo u wanaagsanaayeen dalagga taagan (Galay iyo Bariis) ee ku baxay abuurkii hore ee habnololeedyada dhulka wabiyada ee Shabelle iyo Juba ee haysta tasiilaad shaqaynaya oo dhanka waraabka ah. Dhul diyaarinta iyo dallag beeridda goballada dallaga uu ka baxo ayaa ah ceer caadi ah amaba ka sarreeya xillagan hadda la joogo. Sidoo kale, hawlaha dhul diyaarinta, beeridda iyo haramaynta hore (Deegaamo kooban) ee hab-nololeedka beero-xoolo-dhaqada Waqooyi Galbeed ayaa loo arkaa inay ka sarreeyaan heerarka caadiga ah.

**Qiimaha Badarka iyo Badeeco Iswaydaarsiga**

Qiimaha badarka koonfurta Somaliya waxa uu muujiayay kala duwanaansho intii u dhaxaysay bilihii Jannaayo iyo Maarso. Qiimuhu badarka wadaniga ah (Gallay iyo Masaggo) ayaa kor u kacay inta badan gobollada koonfurta taasoo ay ugu wacan tahay soo saarka badarka oo ku yaraa qeybo ka mid ah gobollada bardarka soo saara (gobollada Gedo, Hiraan, Shabeelada dhexe iyo qaybo kamid ah Bakool) iyo weliba afaafka Afgooy oo ay u badan tahay inay sababtay joojinta la la joojicayay mucaawanooyinkii cunto ee la siin jiray barakacayaashu ku sugan dhulkaa.

**Jaantuska 3: Taxanaha Qiimaha Badarka Heer Gobol (SoSh)**





Gobollada Shabellooyinka celceliska iskudarka qimaha galayda ee bisha Maarso 2010 wuxuu ka sarreeyaa (37%) heerka bishii Disembar ee 2009, iyadoo ay sababtay dallaga gallayda ka soo baxday dhulka wabiga ee wax soo sarkoodu oo ay hoosaysay. Sidoo kale, inkastoo wax dalag badan laga goostay gobadallada Jubbooyinka, isku darka qiimaha gallayda wuxuu ka sarreeya 11% marka loo eego bishii Diseembar ee 2009, sababtuna ay tahay xaaladda nabadgalyda oo si xumaaynaysa tasoo keenaysa xannibaadaha isku socodka gobollada Jubbooyinka. Marka loo eego bishii Maarso ee 2009, si kastaba ha ahatee, qimaha gallayda ee bishii laso dhaafay waa iska dagganaa gobollad Jubbooyinka. Maarso 2010 gudaheeda, qiimihii ugu badnaa ee gallayda laga soo qoray wuxu u dhigmaa 7,000SoSh/halkii kiilo (Jammaame) iyo 11,500SoSh/kg (Jawhar iyo Dhobley), siday u kala horreeyaan (jaantuska 3).

Qiimaha masaggada waa kala duwan yahay marka la eego suuqyada waaweyn ee gobollada masaggadu ka baxdo. Qiimaha waxa u sara u kacay 6% ilaa 25% intii lagu jiray bisha Diseembar ee 2009 ilaa bishii Maarso ee 2010 gobolka Hiraan, iyo qaybo kamid ah gobolka Bakool, iyadoo laga soo sheegay kororka ugu hoseya suuqyada Hiiraan, kororka ugu sarreeyana gobolka Gedo. Dhanka kalena, qiimaha masaggada hoos buu uga dhacay ilaa 22% gobolka Baay (Baydhabo), ayna ugu wacan tahay badar badan oo ka soo go'ay deegaankaas xilligii Deyrtii 2009/2010. Waxaa jira kala duwanaansho aad u weyn oo qiimaha masaggada ah ee suuqyada gobollada masagada soo saara intii lagu jiray bishii Maarso 2010, iyadoo laga soo qoray qiimaha ugu sareeyo 10,000SoSh/kg magaalada Luuq (Gedo) midka ugu hooseeyana (5,000SoSh/kg) Baydhabo (Baay). Marka loo eego bishii Maarso ee 2009, qiimaha masagada ee dhulka masagada ka baxdo suuqyadadooda waxay kordhen ilaa 68%, iyadoo khaas ahaan Hiiraan ay ugu sarayso (47%). Qiimaha masaggada ee Waqooyi Bari (20,000SoSh/kg) iyo Bartamaha (12,500SoSh/kg) ayaa muujinaya koror qiimo sadexdii bilood oo ugu dambaysay (12% iyo 17%, sida ay isugu xigaan). Marka loo eegobishii Maarso 2009 ee kal hore, qiimaha masaggada ayaa kordhay ilaa 23% Waqooyi Bari, halka uu u dhigmo gobollada Bartamaha.

Hawlaha dallag soo saarka ka baxsan xilli beereedka, sida tacab goynta xammaalidda iyo shukulka, iyo sidoo kale beeritanka socda ee Guga 2010 iyo haramaynta/beero abuurka ayaa u abuuray fursado shaqo qoysaska saboolka ah laga soo bilaabo dhamaadkii Febraayo 2010. Taas waxaa dheer. qiimaha mushaar hawl maalmeedyada saboolks oo kordhay gobollada Shabeellooyinka (13%), Jubbooyinka (7%) iyo dhulka masagada ka baxdo (8%) saddexdii bilood ee ugu dambaysay. Si kastaba aha ahaate, kororka qiimaha sare u kacay ee qiimaha badarka marka loo eego mushar hawl maalmeedyada, awoodda wax iibsiga qoysaska, oo lagu cabbiro badeeca iswaydarsiga ka dhexeya badarka iyo mushaar hawl maalmeedyada, hoos ayuu uga dhacay inta badan suuqyada waweyn ee muhiimka ah. Hase yeeshee, qiimaha gallayda oo kor u kacay awgeed badeeca isku baddalka gallay/mushar hawlmeedee gobollada Shabellooyinka iyo Jubbooyinka hoos bay u dheceen labaduba 16% saddexdii bil ee igu dambaysay. Suuqyada Shabeellooyinka, badeeca iswaydaarsiga ugu hooseeya wuxu u dhigma 6-7kg oo gallay lagu beddelanayo mushar hawl maalmeed (Jawhar iyo Afgooye), halka ay ugu sarrayso 10-11kg gallay (Marka iyo Qoryoley).

**Jaantuska 4: Taxanaha Isweydaarsiga Ganacsiga, Badar ku Bedelesho Dakhli Shaqo Maalmeed, Heer Gobol**




Gobollada Jubbooyinka, badeeca iswaydaarsiga gallay iyomushaar hawl maalmeed ayaa sarreeya marka loo eego gobollada Shabeellooyinka, iyadoo qiimaha ugu sarreeya laga soo qoray bishii Maarso ee 2010 suuqa Xagar (7kg/musharka maalin) midka ugu sarreeyana laga soo qoray Kismaayo (19.2kg). Dhulka masaggadu sida wayn uga baxdo, badeeca iswaydaarsiga masaggada iyo mushar hawlmaalmeedyada waa uu ku kordhay suuqyada Baydhabo ilaa 28% iyadoo ay ugu wacan tahay kororka qiimaha masaggada iyo mushar hawl maalmeedka oo aan kordhin (jaantuska 4) koror weyn oo badeeco iswaydaarsiga ah (30%) laga soo billaabo dhamaadkii bishii Diseembar ayaa laga soo sheegay Beledweyne, Hiraan (15kg/mushar hawl maalmeed) ayadoo ay keentay koror heerka mushar hawl maalmee ilaa (38%). Si kastaba ha ahatee, kororkaas badeeca iswaydarsiga ee magaalada Beledweyne ma matali karto awoodda wax iibsiga ee meelaha miyiga ah, halkasoo bishii Maarso 2010 ee heerka mushar hawl maalmeedka aan la xiriirin hawlaha beeraha (SoSh 62,500/malin) uu ahaa mid ka hooseeya 43% marka loo eego magaalada baladwayne (SoSh110,000/malintii). Taas lidkeed waxa ah badeeca iswaydaarsiga masaggada/mushaar hawl maalmeedyada oo hoos dhacay suuqyada gobolka Gedo, sida Baardheere (17%) iyo Luuq (20%), waxayna u dhigman 11kg/mushaar hawl maalmeedka sida ay u kala horreeyaan.

## XOOLAHA

### Daaqa, Biyaha iyo Guurguurka Xoolaha

Roobabkii dambe ee Xayska ee da’ay tobankii beri ee u dambeeyay bisha Febraayo iyo roobabkii Guga ka hor xillida’ay ee u dhexeeyay hearar wanagaansan iyo heerarka celceliska billowgii bisha Maarso, daaqa iyo xaaladaha biyaha ayaa soo hagaagey meelaha abaaruhu wax yeelleeyeen ee beera-xoolo dhaqatada Togdheer iyo banka Sool ee gobolka Sanaag iyo sidoo kale dhulka roobabku ku yar yihiin ee hab-nololeedyada xoolo-dhaqatada Golis, Dharoor, Nugaasha sare, iyo meelo kooban oo ka mid ah Hawdka Waqoyiga Soomaaliya. Sidoo kale waxaa istaagay biya dhaamiskii maadaama roobabkii biyaha ay dib u buuxsheen melihii biyaha laga heli jiray (barkadaha, waraha, ceelgacmedyada iyo togagga) tasoo keentay in qiimihi biyaha hoos u dhoco intii u dhexeysay bilihii Febraayo iyo Maarso ee 2010 (80-90%). Qiimahaasi wuxuu u dhowyahay heerkii qiimaha caadiga ahaa ee *Dayrtii* 2006/07, una dhiganta 2,000-4,000 SoSh/20lt jirgaan. Si kastaba ha ahaate inta badan Hawdka, Gabi, Guban iyo meelaha xeebaha ee waqooyiga wali waa ay qalalan yihiin waxayna wali ku xiran yihiin biyadhamis.



*Xaaladda Lo’ Liidata ee Xoolo-Beeraley Dhaqatada, Buulo-Burte, Gobolka Hiiraan, Maarso ‘10*

Meelo kooban oo ka mid ah Cadduunka, Hawdka, dhulka digirta iyo hab-nololeedyada deex xeebka ee bartamaaha Soomaaliya waxay heleen roobab aan xilli lahayn oo u dhexeeya kuwo fudud ilaa kuwo dhexdhexaad ah bishi Febraayo iyo tobankii bari ee ugu horaysay ee Maarso, kuwasoo hagaajiyay xaaladihii daaqa iyo biyaha. Si kastaba ha ahaate, roobabkani ayaa sababay qulqul dhanka xoolaha ah oo ku wajahan meelahaas, tasoo sababtay xaaluf iyo daaqi iyo biyihii oo horay u dhamaaday. meelo ka mid ahGoobahaa waqooyiga waxaa ka duwan, qiimaha biyaha ee gobollada Bartamaha oo kordhay ilaa bishii Diseembar ee 2009, Ilaa 65% Mudug iyo 16% degmooyinka Galgaduud. Bishii la soo dhaafay, qiima biyaha ee meelo ka mid ahhab-noleleedyada xoolalayda gobolka Galagaduud waxay u dhexeeyeen 21,000-32,500 SoSh/foostadii (200lt), halka ay ay u dhexeeyeen 40,000-41,250 SoSh/foosatadii hab-nololeedyada xoolalayda ee gobolka Mudug. meelo ka mid ahDhulka ay abaaruhu waxyeelleeyeen ee hab-nololeedka xoolalayda geelleyda ee konfurta Hiraan waxay heleen roobab aan xilli haysan oo u dhexeeya kuwo fudud ilaa kuwo dhexdhexad ah, kuwasoo qayb ahaan buuxiyay waraha iyo balliyada meeshana ka saaray biyo la’aantii. Si kastaba ha ahaate, xaaluf joogta awgii roobabku dib uma aysan soo bixin kareyn amaba ma wanaajin karayn xaaladahadaaqa. Taa waxaa ka duwan roobab aan xilli haysan oo da’ay daba-yaaqadii bishii Febraayo iyo horaantii bishii Maarso meelaha abaaruhu wax yeelleeyeen ee Bakool iyo Gedo, ayaa dib u buuxiayay meelihii biyo qabatinka waxayna hagaajiyeen daaqa. Xaaladaha biyaha iyo daaqa waa ay sii hagaageen gobollada Jubbooyinka iyo Shabeellooyinka markii la helay roobabkii Todobka ee u dhexeyay kuwa wanaagsan ilaa heerka celcelis isla wakhtigaas.

Hormarkaas kor lagu xusay ee xaaladaha daaqa iyo biyaha waxuu saameeyay qaabkii guur-guurka xoolaha intii lagu jiray xilligii jiilaalka ee la soo dhaafay. Waqooyiga, xoolihii hore ugu guuray xoolahadooxada Nugaal iyo dhulka xoladhaqatada ee guban ee waqooyi galbeed iyo banka Sool ee gobolka Bari waxay billaabeen inay dib ugu soo noqdaan degaamadoodii. Xooluhu waxay kaloo dib ugu soo laabteen goballada Gedo iyo Bakool ka dib dhowr xilli oo qax aan caadi ahayn ay ugu aadeen goballada dariska ee Baay iyo Jubbooyinka. Si kastaba ha ahaate gobollada Bartamaha guur-guur xoolaad baaxad leh oo isla gudaha gobolladaasi ah xoolahaayaa weli sii socota, xoolihii qaxay Dayrtii 2009/10 weli kuma aysan soo noqon meelihii ay horay uga guureen.

### Xaaladaha Muuqaalka Xoolaha iyo Wax-soo-saarkooda


Xaaladaha jirka xoolaha waxay bilawday inay soo hagaagto sababtoo ah xaaladaha daaqa iyo biyaha oo heer celcelis ku soo noqday meelo ka mid ahmeelo ka mid ah Bakool, Hiraan, Sanaag, Togdheer, Bari, Waqooyi galbeed iyo gobolka Awdal kuwaasoo helay roobab aan xilli lahayn. Si kastaba ha ahaate, xaaladaha jirka lo’ada iyo idiha wali waa ay liidataa ayagoo u nugul abaraha. Taa waxa ka duwan xaaladaha jirka xoolaha oo sii xumatay gobollada Bartamaha xilligii jilaalka oo xumaa awgii, lakiin wax xoolo ah oo dhintay lama soo sheegin. Wax-soosaarka caanaha

suuqyada

ayaa soo yara hagaagay Bartamaha iyo goballada waqooyiga maadaama ay riyiha dhalid bilabeen, in kastoo aanan la arkin dhalidda geela iyo idaha wakhtigii xogta la shaacinayay.

Koonfurta, dhalidda riyaha iyo idaha ayaa ka billaabatay dhamaan goobaha hab-nololeedyada, dhalmada geela iyo lo'adana waxaa la filaayaa bisha julay 2010. Heer dhimasho ari oo sarreeya ayaa laga soo sheegaya degmada Afmadoow ee Jubbada Hoose, uuna sabay cudur aan la garanayn oo ku dhacay dhuun mareenka, sida ay soo sheegeen dhakhaatiirta iyo xoolo dhaqoto ku sugan goobtaasi.

**Jaantuska 5: Taxanaha Isweydaarsiga Ganacsiga, Badar ku Bedelesho Dakhli Qiimo Ri Heer Gobol**




**Ganacsiga Xoolaha, Qiimohooda, iyo Badeeca Iswaysdaarsiga**


Intii u dhexeysay bilaha Jannaayo iyo Maarso ee 2010 ilaa 558,545 neef oo xoola ah ayaa laga dhoofiyay Soomaaliya kuwasoo 51% laga dhoofiyay dakadda Berbera, halka 49% laga dhoofiyay dakadda Boosaaso. Tiradaasi waxay 17% ka sarraysaa tii sanadkii hore ee xilligaan. Qaadidda xayiraadda dhoofka xoolaha ee Sucuudi Careebiya iyo dalabka xoolaha nool oo kordhay ayaa wuxuu joojiyay inay shaqeeyaan wanqalladii xoolaha lagu qali jiray ee Burco, Beledweyne, Muqdisho iyo Gaalkacyo. Qiimaha rida daabaxa ah wuxuu kordhay 5-13% saddexdii bilood oo ugu dambaysay inta badan suuqyada dhulka masaggadu ka baxdo ee gobollada Shabeellooyinka iyo Bartamaaha. Taa waxaa ka duwan, qimuha oo hoos u yara dhacay (7-8%) gobollada Jubbooyinka iyo Waqooyiga Bari isla xilligaas. bishii Maarso ee 2010, heerka celceliska badeeca isku badalashada rida daabaxa ah iyo badarka ayaa kordhay dhulka masaggadu ka baxdo, Waqooyi galbeed, Bartamaha, halka gobollada Jubbooyinka, Shabeelloyinka iyo Waqooyi Bari ay hoos u dheceen marka la barbar dhigo bishii Diseembar ee 2009, taaasoo ay ugu wacan tahay qiimaha badark oo kor u kacay (11%-37%) isla goobahaasi. Marka loo eego heerkii bishii Maarso 2009, badeeca isku badalashada rida daabaxa ah iyo badarka ayaa sarreeyey waddanka intiisa badan marka laga reebo dhulka masaggadu ka baxdo iyo gobollada Shabeellooyinka. Tusaale ahaan, badeeco isweydaarsiga bishii Maarso ee 2010 ee gobollada Jubbooyinka, Waqooyi Galbeed, Waqooyi Bari iyo Bartamaha waxay ahayeen kuwo 4%, 11%, 27% iyo 20% ka sarreeya marka labarbar dhigo bishii Maarso ee 2009, siday u kala horreeyaan, halka ay ka hooseeyeen 31% dhulka masaggadu ka baxdo iyo gobollada Shabeellooyinka (jaantuska 5)

**SUUQYADA**

**Qiimaha Sarrifka**

Shilinka Saomaaligu ayaa xoogaa yara xoogaystay sadeexdii bilood oo ugu dambaysay inta badan suuqyada koonfurta. Tusaale ahaan, suuqa wayn ee Muqdisho, Bakaaraha, shilinku ayaa qiimihiisa kor u kacay 5% marka loo eego doollarka Maraykanka (laga billaabo SoSh 31,850/USD bishii Jannaayo ilaa SoSh 630,400/USD bishii Maarso) Kismaayo-na wuxuu kor ugu kacay ilaa 4% (laga billaabo SoSh 31,525/USD bishii Jannaayo ilaa Sh30,320/USD bishii Maarso). Soo wanaagsanantaas shilinka Soomaaliga waxa sababay doollarka dalka soo galaya oo siyaaday asagoo ka imanaya ganacsiga xoolaha iyo howlaha burcad badeedda. Si kastaba ha ahaate, marka loo eego bishii Maarso ee sanadkii hore, shilinka hoos buu u dhacsan yahay ilaa 8% labada suuqba. Heerka hoos u dhaca shilin Soomaaliga wuxuu aad uga sarreeyaa siduu ahaa ka xilligii sicir bararka ama sannaddii gundhiga (Maarso 2007), una dhexeeyay 90-100% dhamaan suuqyada koonfurta Soomaaliya (JaantuskaJaantuska 6). Qiimaha shilinka ayaa sidaasi si la mid ah amaba ka deggan ka muujiyay suuqyada, gaar ahaan afartii bilood oo ugu dambaysay. Sidoo kale, shilinka Soomaalilaan ayaa in yar qiimihiisu kor u kacay suuqa Hargeesa. Bishii ugu dambaysay, shilinka Soomaalilaan ayaa la kala siisanayay celcelis ah 6,663oo shilin marka la barbar dhigo doollarka, taasoo muujinaysa qiyaas koror qiime oo 1% ah ilaa bishii Jannaayo ee sanadkan (6,700SlSh/USD). Si kastaba ha ahaate shilinka Soomaalilaan wuxuu muujiyay hoos u dhac 6% ah isla suuqaas marka la barbar dhigo xilligii sicir bararka ka hor (Maarso 2007)


**Jaantuska 6: Sarifka Lacagaha ee Billaha ah - SoSh iyo SLSh ku Bedelesho Doolar (USD) Heer Gobol**




**Qimaaha Badeecadaha la soo Dejiyo**


Laga soo billaabo bishii Jannaayo 2010, qiimaha badeecadaha la soo dajiyo ayaa si joogto ah u kordhayay badanaaba suuqyada waaweyn ee Bariga iyo Bartamaha (Jaantuska 7). Si kastaba ha ahaatee, qiimaha Goroowe iyo Boosaaso ayaa kordhay: bariiska (16% iyo 14%, siday isugu xigaan) iyo sokorta (24% iyo 14% siday isugu xigaan). Tani ayaa badanaaba waxa sababay hoos u dhac yar oo ku yimid badeecadaha suuqyaadii laga keeni jiray ee Dubaay, Bakistaan iyo Taylaand, iyo sidoo kale qiimaha kororka kharasha soo dejinta iyo waxyaabaha la xiriira ayadoo ugu wacan khatarta la xiriirka sii socodka hawlaha burcad-badeedinmada xeebaha Sooomaaliya iyo kuwa ka baxsamba. Taa waxa lidi ku ah, qiimaha badeecadaasi ee ee gobollada koonfurta oo deggan amama qiimohoodu hoos u dheceenayagoo la socda qiimaha sarrifka. Suuqyada Muqdisho iyo Qoryooleey ayaa muujinaya hoos u dhac qiime halka suuqyada Baydhabo iyo Gaalkacyo ay wali iska daggannaayeen saddexdii bilood ee ugu dambaysay. Si kastaba ha ahaate, celceliska qiimaha badeecadaha la soo dejiyo ee Waqooyi Galbeed ayaa muujiyay kala duwanaansho iyadoo qiimaha bariisku uu hoos u yara dhacay ilaa 2% isla markaasna sokorta ay kor u kacdsay ilaa 9%. Kororka dhacdooyinka

**Jaantuska 7: Taxanaha Qiimaha Ascaarta la soo Dhoofiyo Heer Gobol Loo Barbar Dhigo Sarifka Lacagaha ee Gobolka Waqooyi Bari**



burcad-badeednimo ee lagu beegsanayo doomaha alaabada sidda ee ee ka imanaya Imaaradka Carabta una socda koonfurta Soomaaliya ayaa waxay keeni kartaa qas ku yimaada soo dejinta cuntada, taasoo ka iman karta koror ku yimaada qiimaha cunnada bilaha soo socda (eeg Qaybta Colaadaha Sokeeye).

**Jaantuska 8:Taxanaha Tixraaca Cabirka Qiimaha Macmiisha Heer Gobol.**




**Qiimaha Nolasha ee Reer-magaalka Saboolka ah**

Qiimaha badarka iyo badeecadaha kale oo kordhay ayaa waxay keeneen inuu kordho kharashka ugu yar ee lagu noolaan karo (KYN) gaar ahaan gobollada Bartamaha, Koonfurta iyo Waqooyi Bari. Intii u dhaxaysay bilihii Diseembar ee 2009 iyo Maarso ee2010, celceliska kharashka ugu yar ee lagu noolaan karo ama Tusaha Qiimaha Iiibsada (CPI) wuxuu kordhay ilaa 8-27% Waqooyi Bari, Bartamaha iyo Koonfurta ayadoo ayadoo gobollada Bartamaha lagu arkay qiimaha ugu sarreeya (Jaantuska 8). Kororka Tusaha Qiimaha Macmiilka (CPI) ee meelo ka mid ah meelaha Shilin Soomaaliga laga isticmaalo ee bilihii la soo dhaafay ayaa loo aanaynayaa qiimaha masaggada oo kordhay (19%), iyo sidoo kale sonkorta (8%), caanaha (11%) iyo saliidda (2%), kaasoo isku darkoodua ugu kacaya 86% kharashka ugu yar ee lagu noolaan karo ee saboolka reer magaalka. Tusaale ahaan, qiimaha masaggada ee suuqyada waaweyn wuxuu kor u kacay celcelis gaaraya 24% Koonfurta, 18% Bartamaha iyo 17% Waqooyi Bari saddexdii bilood oo ugu dambaysay. Celceliska Tusaha Qiimaha Iibsadaha (CPI) ee meelo ka mid ah dhulka Shilin Soomaaliga waxuu kor u kacay 16% iyo 127% marka loo eego bishii Diseembar ee 2009 iyo xilligii sicir bararka ka horreeyay ee Maarso 2007, siday isugu xigaan. Koror ku yimi qiimaha alaabada kale ee aasaasiga ah ee meelo ka mid ah dhulka Shilin Soomaaliga laga isticmaalo sida sokorka (8%) iyo caanaha (11%) ayaa qeyb ka haa kororka Tusaha Qiimaha Iibsadaha (CPI), in kastoo saamayntu ay yar tahay. Dhinaca kale, Tusaha Qiimaha Iibsadaha ee meelo ka mid ah dhulka laga isticmaalo Shilinka Soomaalilaan wuxuu hoos u dhacay ilaa 2% tan iyo bishii Diseembar ee 2009, taasoo tilmaaysa saamayn sicir barar oo yar ee qiimaha badarka (hoos u dhac 31% iyo 14% ee qiimaha masaggada iyo burka, siday u kala horreeyaan). Natiijo ahaan, Tusaha Qiimaha acmiilk (CPI) ee meelo ka mid ah dhulka laga isticmaalo shilinka Soomaalilaan wuxuu 8% ka sarreeyaa sanadka sicir-bararka ka horreeeyey (Maarso 2007)

**XAALADA NAFAQO**

**Sahanka Nafaqada ee beero Xoloeyda Togdheer**

Natiijada hordhaca ee sahanka nafaqada ee beero- xoololeyda deegaannada gobolka Togdheer ee la qabtay bishii Maarso ,2010 ayaa muujinaysa xaaladda nafaqodarro ***Culus***, taas oo **heerka nafaqa darida guud** ay noqotay **12.2%** iyo **halka heerka nafaqda daran**i ay noqotay **2.3%,** taasoo muujinays in xaaladdu soo hagagayso laga so bilabo Gu’ 2009 oo markaas oo ay xaaladdu ahayd heer khatar . Faahfaahinta sahan kan waxaa lagu soo bandhigi doonaa warsidaha xogta nafaqada ee bisha April.Sahanno Shan ah ayaa la qorshanayaa in ay bilaabmaan bisha May, kuwaas oo laga samayn doono deegaannada xoolo leyda ee Hawd iyo Cadduun ee gobollada dhexe/ woqooyi bari iyo Gobolka Hiiran oo laga samaeyn doono deegaannnada webiga jiinkiisa ah ,Beero-xoololeyda iyo Xoolo dhaqatada.

**Gobalka Bari**

Bishii Maarso 2010 , hayadda falaqeynta sugnaanta Cuntada iyo Nafaqada(FSNAU) iyo haya’daha ay jaalka yihiin waxay sameeyeen baaritaan nafaqo oo dagdag ah oo lagu eegayey xaaladaha degaannadaas oo sii xuumaanaysay. Waxaa sahankaas laga sameeyey 15 tuulo oo laga soo xulay degmooyinka Bossaso, Iskushuban, Qandala Iyo Caluula ee gobolka bari ee waqooyi bari. Ilmo tiradooku tahay 360 oo ay da’doodu u dhexeyso 6-56 bilood ayaa la baaray, **13.9%** waxay noqdeen xaalad nafaqo darro guud ee cusub(WHZ<-2Z dhibco ama barar ),halka **2.5% ay noqdeen xaaldda nafao darida ee liidata ee** (WHZ<-3Z dhibco ama barar). Natiijadasi waxay tilmamaysa xaalad nafaqo oo **halis ah. taas oo la mid ah natiijooyinkii laga soo saaray degaannadaas xillgii deyrta kadib** 2009/10. Waxyaabaha gundhiga u dhibaatadan ayaa la sheegay in ay yihiin ;cuduro badan, cunto xumi iyo caanaha oo yaraaday.

**Baaris Nafaqo Magaalo**

Qeyb ahaan, baaritaannada magaalooyinka , baaris nafaqo oo dagdag ah ayaa laga sameyay 25 meelood oo ka mid ah magaloyinka somaliya. Sahannadaasi waxaa la baaray: cabirka wareegga bartamaha qeybta sare cududda (MUAC) ee 4511 ilmood oo ay dadeedu u udhexeeyso 6-59 bilood oo laga xushay 780 guri , waxaa kale oo la eegay cnista cunnooyinka kala duwan ee qoysku isticmaalay 24 saac la soo dhaafay iyo ogaanshaha qoysaska isticmaaly tababka maareynta nolosha ee liidata. Natiijadan waxaa la barbar dhigay tii sanadkii hore xilligan oo kale la qabtay ee 2009. Madaama ay sahannadani aysan aheyn kuwo dhan oo dadkoo idil aan matali karin, markaa waa in loo fasirtaa si taxadir ku jiro. Natiijadu waxay muujisay magalooyinka ay xaaladdooda nafaqo daridu ay aad nugushahay, laguna arkay inta ugu badan ee ciyaalka nafaqa darada darani ay hayso (MUAC<12.5cm ama barar)waxay ahayeen Jawhar, Ceeldheer iyo Burco (shabelada hoose, Bartamaha, Baay iyo gobolka Burco siday ukala horeyaan). Nafaqo darida ka jirta magalloyinka Ceeldheer iyo Ceelbarde ayaa waxaa loo anaaneynayaa xaaldda cuntada qoyska oo liidata. Magaalooyinka Baay iyo Shabelle , waxyaabaha gundhiga u ah nafaqo xumida waa cuntada ciyaalka lasinayo oo an kala duwanayn iyo cuduro. Waxaa kale oo la soo sheegayaa in qoysas badan oo kugan magaalooyinka Burco iyo Laascaanood ay cunaaaan cuntoooyin kala duwnaantoodu ay liidato (<4 noocyada cuntada). Iibsashadu waa sida cuntada lagu helo marka laga reebo magaloyinka Buaale/Saakow iyo Laascanood melahas oo cuntooyinka lagu helo wax soo sarka iyo zakada. Magaalooyinka qaarkood sida Afgooye Hargeysa,Laascaanood, Celdheer, Celberde , Xuddur ,Belet -Xaawo iyo Xaradhere waxaa soo badanaya qoyska isticmalaya heerarka tabaha maareynta nolosha ee liidata marka loo fiiriyo xilligan oo kale sanandkii 2009.

Shuban Biyood Xun (AWD)

WHO waxay soo shegtay Inay korodhay tirada shuban biyoodka ee gobalka shabelada hoose Iyadoo dib logu firshay xarunta dawaynta dacunka ee Isbatalka (CTC) Intii u dhexeysey Maarso 27 Ilaa 1 Abriil 2010. Xogta laga helay Isbataal Banadir waxay tilmamaysa Inay dhacdooyin hoos u dheceen 12kii usbuuc marka loo firsho usbuuca 10 Iyo kan 11 Iyadoo hal dhacdo lagu xaqiijiyay dulinka keena shubanka oo ah "Vibrio Cholera" ayado la Isticmalayo habka loo yaqaan "Cholera Smart 11" baaris shaybaar oo dagdag ah 16 Maarso 2010. Iyadoo 19tijaabo laga soo ururiyay Isbital Banadir Iyo Xabiib CTC's, sideed dheeraad ah waxa laga helay 'Vibrio Cholera serotype 'Inaba'. Iyaday soo baxayaan dhacdooyin cusub barakacuna uu sii kordhayo Muqdisho waxa dhici karta in cudurka faraha ka baxo. WHO waxay ugu yeertay hayadaha saxiibadeed ee cafimadka xaaladas inay kajawabaan. Warbixinadii ugu dambeeyay ee WHO fadlan booqo websaydkan: www.emro.who.int/somalia/collaborativeprogrammes-eh.htm.

nafaqada

# FALANQAYNTA BAAHSAN EE SUGNAANTA CUNNADA

## MAGAALOOYINKA

**Hordhac**

FSNAU waxay qabatay warreegii 9aad ee sahminta magaalooyinka ee saddexdii biloodba mar la sameeyo labadii toddobaad ugu dambeeyay ee bisha Maarso, iyadoo ka samaysay 22 magaalo oo Soomaliya ka mid ah. Muqdisho lagama qaadi xog xaalad nabad gelyo darro awgeed, in kastoo magaaloyinka waaweyn ee kale ee dalkoo idil la booqday (Tabeellaha 1). Waa markii ugu horraysay ee FSNAU ay kala saartay falanqayta sugnaanta cuntada ee magaaloyinka iyadoo u kala qaybisay dhawr qaybood ee la xiriira hab-nololeedyada kala duwan ee magaaloyinka Soomaaliya si loo kordhiyo saxnaanta qiyaasaha iyo in la hubiyo isu-eegid kala duwanaanshaha magaalooyinka. Habnololeedyada magaalooyinka ayaa loo kala qaybiyay 3 qaybood oo waaweyn oo ku salaysan tirada dadka iyo dhaqdhaqaayada dhaqaale:

- Magaalooyinka waaweyn, kuwaasoo waween ee dadkua ku badanyahay.
- Magaalooyin dhexe, halkasoo dadku ay badanaaba kharashka soo gala ay ka helaan hawlaha la xirira shaqooyinka magaalooyinka la xiriira oo ay weheliso xooga dakhli ah oo ka yimaada dhanka beraha iyo xoolaha, iyo
- Magaalooyin yar yar oo oo dakhligoodu si xoog ah ugu tiirsan yahay hawlaha la xiriira beeraha iyo xoolaha.

**Shaxda 1: Magaalooyinka la Sahamiyey.**

| # | Zone | Region | Assessed Towns | Town Category |
|---|---|---|---|---|
| 1 | North SlSh | W. Galbeed | Hargeisa | urban |
| 2 | | Awdal | Borama | urban |
| 3 | North SoSh | Sanaag | Erigavo | semi-urban |
| 4 | | Togdheer | Burao | urban |
| 5 | | Bari | Bossaso | urban |
| 6 | | Nugaal | Garowe | urban |
| 7 | Central | Mudug | Galkayo | urban |
| 8 | | | Elder | peri-urban |
| 9 | | | Haradhere | peri-urban |
| 10 | | Galgaduud | Dhusamareb | semi-urban |
| 11 | | | Abudwaq | semi-urban |
| 12 | South | Hiran | Beletweyne | semi-urban |
| 13 | | Lower Shabelle | Afgoye | peri-urban |
| 14 | | Lower Juba | Afmadow | peri-urban |
| 15 | | | Dhobley | semi-urban |
| 16 | | Middle Juba | Buale | peri-urban |
| 17 | | Gedo | Bardera | semi-urban |
| 18 | | | Belethawa | semi-urban |
| 19 | | Bay | Baidoa | urban |
| 20 | | | Dinsor | semi-urban |
| 21 | | Bakool | Hudur | peri-urban |
| 22 | | | Elbarde | peri-urban |

Falanqaynta xogta la soo qaaday iyo weliba xogo kale oo hore loo qoray ayaa muujinay in sicir bararka daba dheeraaday ee qiimaha cuntada iyo colaadaha sokeeye ay yihiin arrimaha ugu daran ee saamaynaya sugnaanta cuntada ee habnololeedya saboolka ku nool magaalooyinka Soomaaliya., Saamaynta sicir-barararka sii socda ee saddexdii bilood ee ugu dambeeyey, gaar ahaan firileyda gudaha laga beero, joogitaanka sii socda ee barakacayaasha ku sugan magaalooyinka iyo samafalka bini'aadminimo oo sii yaraanaya, gaar ahaan gobollada bartamaha iyo koonfurta ayaa ah arrimaha ugu daran ee saameeyey cunno helidda saboolka magaalooyinka. Inkastoo 580,000 oo sabool reer magaal ah ay ku sugan yihiin xaalad ba'an oo bani'aadminimo, qiimo koror amaba sarreyn heerka mushear hawl maalmeedyada waddankoo idil ah, helitaanka shaqo oo heer dhexdhexaad ah iyo raashin laga helo sakada oo ka jira meelo ka mid ah dhul beereedyada koonfurta ayaa ah kuwo hoos u dhigay amaba khafiifiyay inay xaaladaha dadkaasi ay sii xumaadan. Dadka saboolka ee ku dhaqan gobollada dhexe, si kastaba ha ahaate, ayaa ah kuwo walaac leh maadaama heerka sicir bararka iyo qiimaha cuntada oo sarreeyaan, dakhliga soo galaya dadkana uu hooseeyo, isa saacididda bulshada dhexdeedana ay yaraatay ka dib dhow sanno oo dhibaatooyin bani'aadminimo ay ka jireen deegaamadaaasi.


**Sicir-bararka, Qiimaha Nolosha ugu Yar iyo Awoodda wax libsiga**

Sicir-bararka, oo lagu cabbiro Tusha Qiimaha libsadaha - CPI (is-beddelka qiimaha kharashka nolosha ugu yare ee lagu noolaan karo – CMB – ee sanadka ka horreeya sicir-bararka) ayaa weli sarreeya waddankoo idil, taasoo muujinaysa koror hor leh laga soo bilaabo bishii Diseembar ee sanadkii la soo dhaafay ee meelo ka mid ah dhulka Shilin Soomaaliga laga isticmaalo (Bartamaha, Koonfurta, iyo Waqooyiga Bari) iyadoo uu in yarna uu hoos u dhacay meelo ka mid ah dhulka laga isticmaalo Shilinka Soomaalilaan. Kororka ugu sarreeya ee sicir bararka ah waxa laga helay Bartamaha Soomaaliya, asagoo ka kordhay 140% bishii Diseembar ee 2009 gaarayna 167% bishii Maarso ee 2010. Sicir bararka (CPI) ayaa kordhay ilaa iyo 8-14% Waqooyiga Shilin Soomaaliga laga isticmaalo (112% ilaa 120%), Konfurtana (80% ilaa 94%) isla xilligaas (eeg Qaybta Suuqyada). Qiimaha badarka waddanka laga soo saro (masaggo iyo galley) waa uu sarreeyaa marka loo eego heerkii ka hor sicir bararka waddankoo idil, waana uu sii kordhay saddexdii bilood oo ugu dambeeyay. Qiimaha gallayda, oo laga isticmalo gobollada gallayda soo saara ee Shabeellooyinka iyo Jubbooyinka iyo sidoo kale Muqdisho, ayaa waxay kordheen ilaa 37%, 11% iyo 60%, siday isugu xigaan. Kororkaas waxaa keenay wax soo saarkii *Dayrtii* 2009/10 oo hooseysay goballada Shabeellooyinka, iyo baahida oo korodhay kadib markii la joojiyay qaybinti cuntada mucaawinada ee koonfurta iyo weliba qaska la xiriira colaadaha sokeeye oo saameeyey hawlaha ganacsi. Isla wakhtigaa, qiimaha masaggada ee koonfurta wuxuu sare ugu kacay (24%), Bartamaha (18%) iyo meelo ka mid ah Waqooyiga shilin Soomaaliga laga isticmaalo (17%), heerka ugu sarreeyana lagu arkay Waqooyi Bari (SoSh 20,000/kg) taasoo ay keentay qiimaha gaadiidka koonfurta ka imanaya oo sarreeya. Isla wakhtigaa, qiimaha masaggadu hoos buu u dhacay meelo ka mid ah Waqooyiga shilinka Soomalilaan laga isticmalo (31%). Isticmaalka oo yaraaday awgeed madaama dadku ay bariiska aad u isticmaalaan iyo suuqa oo aad loo keenay masaggada ayadoo wax soo saar wanaagsan la filayo xilli beereedka soo socda. Qiimaha bariiska, oo ah cunnada daruuriga Waqooyiga iyo qaybo kamid ah gobollada Bartamaha, ayaa ku kordhay meelo ka mid ah Waqooyiga shilin Soomaaliga laga isticmaalo (SoSh 19,000/kg ilaa SoSh 21,000/kg) iyo Bartamaha (SoSh 23,300/kg ilaa SoSh 23,700/kg). Taas waxa ka duwan qiimaha bariiska oo hoos u dhacay ilaa 4% Waqooyiga shilinka Soomaalilaan laga isticmaalo iyo sidoo kale gobollada Koonfurta.


Masaggadu waa badarka ugu raqiisan aadna looga cuno waddankoo dhan, khaasatan waqtiyada dhibaatada. Sababtaas daradeed masaggadu waa qaybta ugu wayn ee inta ugu yar ee waxyaabaha daruuriga ah (MEB) ee saboolka magalooyinka ayadoo baahida ugu yar ee tamarta (energy) lagu noolaan karo loo qoondeeyey 2100kcal qofkiiba malintii ee qoys ka kooban lix ilaa todobo qof.. Isbeddelada qiimaha masaggada ee sadexdii bil ee ugu dambaysay iyo sidoo kale isbaddalka qiimaha sonkorta (fiiri qaybta suuqa) waxa ay raad ku yeesheen kororka kharshka ugu yar ee lagu noolaan karo (CMB) ee saboolka magaalooyinka waddanka oo dhan, marka laga reebo Waqooyiga shilinka Soomaalilaan laga isticmalo, halkasoo kharaskha ugu yare ee nololeed (CMB) uu in yar hoos u dhacay ayna ugu wacan tahay qiimaha masaggada oo hoos u dhacay (Jaantuska 9).

Guud ahaan kharshka ugu yar ee nololeed (CMB) wuxuu kor u kacay in yar Koonfurta (14%) iyo Waqooyi laga isticmalo shilin Soomaaliga (8%) iyo koror dhexdhexaad ah Bartamaha (27%) iyo ceceliska kharshka yar ee nololeed (CMB) ee deegaamadaasi uu u dhigma SoSh 1,914000, SoSh 4,130,000 iyo SoSh 3,768,000. Waqooyiga shilin Soomaalilaanka laga isticmaalo kharashka ugu yare ee nololeed (CMB) wuxuu hoos u dhacay ilaa 2%, 823,277 ilaa SlSh 811,081 oo ay ugu wacan tahay qiimaha masaggada oo hoos u dhacay. Marka la eego kala duwanaanshaha magaalooyinka, koror kharashka ugu yar ee nololeed (CMB) ayaa waxa lagu arkay magaalooyinka dhexdhexaadka ah, (6-14%) marka laga saaro Koonfurta halkasoo uu hoos uga dhacay wax yar ilaa 2%, iyo sidoo kale magaalooyinka yar yar ee koonfurta iyo Bartamaha (10-20%). Taa waxaa ka duwan, kharashka ugu yare e nololeed (CMB) oo hoos uga dhacay (4-7%) magaalooyinka waaweyn ee Soomaaliya. Taasina waxa keenay cuntada iyo waxyaabaha aan cuntada ahayn oo raqiisay meelo ka mid ah magaalooyinka waaweyn, kuwaasoo gaarsiiya badecooyinka magaalooyinka yar yar taasoo ku kordhinaysa kharash hor leh oo la xiriira gaadiidka.

**Jaantuska 9: Falanqeynta Taxanaha Hal Beega Kharashka ugu Yar ee Suuqa Wax Lagaga Iibsan Karo.**




**Jaantuska 10: Celceliska Heerarka Tacab Goosi, Qiimaha Badarka iyo Isweydaarsiga Ganacsiga ee Goobaha laga Isticmaalo SLSh.**




Badeeca isweydaarsiga (shaqo iyo badar) ayaa guud ahaan hoos u dhacay saddexdii bilood ee ugu dambeeyay suuqyada ugu waweyn ee magaalooyinka taasoo sababtay qiimaha masaggada oo kor u kacay. Waxa ka duwan taas suuqyada dhulka masaggada laga soo saaro (Baydhabo iyo Baladwayne), halkasoo uu kor u kacay badeeca iswaydarsiga, 28-30%, ayna sababtay qiimaha masaggada oo hoos u dhacay Baydhabo (22%) iyo iyadoo sare uu u kacay heerka mushaar hawl maalmeedyada ee Beledweyne (38%) taasoo ay u sabab tahay iska hor imaadyadii iyo colaadihii magaalada ka dhacayay oo yaraaday. Celcelis ahaan, bisha Maarso ee 2010, badeeca iswaydarsiga koonfurta wuxuu gaaray 11kg/shaqo maalin, taasoo tilmaamaysa hoos u dhac 8% saddex bilood ka hor iyo 15% isla bishaas sanadkii la soo dhaafay. Gobollada dhexe, badeeca iswaydarsiga masaggo/shaqo maalin ku beddelashada waa sidoodii hore (4kg/shaqo malin) ilaa iyo bishii Diseembar ee 2009, lakiin waxa loo arkay inuu ka sarreeyo (ilaa 48%) bishii Maarso ee sanadkii hore (2.7kg/shaqo maalin). Taa waxaa ka duwan, badeeca is waydarsiga (shaqo/bariis) hoos buu u dhacay Waqooyiga shilin Soomaaliga laga isticmalo (9%) iyo Waqooyiga shilinka Soomalilaand laga isticmaalo (17%) saddexdii bilood ee ugu dambeeay, 5.5 ilaa 5kg/shaqo maalin iyo 6.8kg ilaa 5.7kg/shaqo maalni, siday isugu xigaan, inkastoo ay ka sarreeyaan (16% iyo 14%, siday isugu xigaan) marka loo eego isla xilligan sanadkii hore (Maarso 2009) (Jaantuska 10). Hoos u dhaca ayaa waxa keenay qiimaha bariiska oo kor u kacay Waqooyiga shilin Soomaaliga laga isticmalo iyo qiimaha mushaar hawlmaalmeed oo hoos u dhacay waqooyiga shilinka Soomaalilaan laga isticmaalo. Marka gobol ahaan loo eege, badeeca iswaydarsiga ugu sarreeya waxa laga helay Koonfurta ayna ugu wacan tahay badarka laga soo saaro gudaha waddanka (masaggo iyo galley) oo jaban, halka uu ugu sarreeyo Bartamaha iyadoo uu qiimaha bariiska iyo mushaar hawl maalmeedyadu ay sarreeyaan.

**Dakhliga, Helidda Shaqada iyo Qiimaha Mushar Hawl Maalmeedyada**

Falanqayn lagu sameeyay dakhliga saboolka magaalooyinka (Maarso 10) wuxuu muujinayaa heerar kala duwan marka loo eego heerka siduu ahaa saddexdii bilood ee lasoo dhaafay (Diseembar 2010). Dakhliga soo gala saboolka magaalooyinka waweyn, magaalooyinka dhexdhexaadka ah iyo magaalooyinka yar yar waa ay kordheen iyagoo ku xiran heerka sicir bararka ee xilligaas. Waxaa taa ka duwan magaalooyinka yaryar ee koonfurta halkaasoo dakhliga uu hoos u dhacay wax yar saddexdii bilood oo ugu dambaysay, ayadoo ay u egtahay inay sababtu tahay howlaha samafalka oo istaagay, saamaysana fursadaha shaqo ee dhanka xamaaliga - oo ah mid ka mid ah shaqooyinka ugu muhiimsan ee ay helaan saboolka magaalooyinka. Marka la eego natiijooyinkii ka soo baxay barista la sameeyey, celcelis ahaan, ragga ka tirsan qoysaska saboolka ah waxay heleen 20-24 malmood oo shaqo maalmeed ah bishii Maarso 2010, halka dumarka iyo caruurta ay ku hawlanaayeen shaqooyinka ay iskood u qabsadaan (sida ganacsiga yaryar, biyo iibin, iwm.). Guud ahaan, qiimaha mushaar hawl maameedyada saboolka waa uu kordhay saddexdii bilood ee ugu dambeeyay Koonfurta iyo Waqooyiga shilin Soomaaliga laga isticmaalo ayadoo wakhtigaasi sicir-bararka iyo qiimaha badarkuba ay sare u kacayeen. Hase yeeshee, qiimaha mushaar hawl maalmeedyada ee Bartamaha ayaa weli sidisii ah ama wax yar hoos u dhacay laga soo billaabo bishii Diseembar ee 2009, ayadoo uu hoos uga dhacay Waqooyiga shilinka Soomaalilaan laga isticmalo sababtuna tahay hawlaha la xiriira dhismooyinka oo hoos u dhacay iyo dadka shaqada radinaya oo tiradoodu badatay.

Guud ahaan dakhliga saboolka inta badan magaalooyinka waa uu ku filnaa inuu kaabo kharaskhka ugu yare ee nololeed (CMB). Hase ahaatee, heerka dakhliga soo galaya saboolka gobollada Bartamaha oo yaraa awgii, khasatan dhulka abaarta ku habsatay ee Cabudwaaq, Dhuusomareeb iyo Ceeldheer, faraq la xiriira kharashka ayaa weli ka sii jira goobahaasi waxana uu sii kordhay ilaa 34-46% marka loo eego saddex bilood kahor. Faraqa kordhay ayaa waxa sababay hoos u dhac ku yimi taageerada lacageed ee bulshada dhexdeeda ah (xawaalad, taageero lacageed, iyo deyn), laga soo billaabo celcelis dhan qayb ahaan 24% dakhliga bishii Diseembar 2009 ilaa 13% bishii Maarso ee 2010, ayadoo sababtu tahay is taageeristii oo yaraatay maadaama ay abaaraha, dagaallada, iyo jogitaanka tira badan oo barakacayaal ah ay saameyn ku yeelatay. Taa waxaa dheer, dakhliga iscaawinta bulshada ee soo gala saboolka reer magaalka ah oo ku kordhay meelaha shilinka Soomaaliga laga isticmaalo cadad dhan 2-8%. Bishii Maarso ee 2010, dakhliga ka yimaada iscaawinta ee dakhliga guud ee saboolka reer magaalka wuxuu u dhigmay 17% Koonfurta, 27% Waqooyiga shilin Soomaaliga laga isticmaalo iyo 20% Waqooyiga shilinka Soamaalilaan laga isticmaalo.

**Urban Nutrition Analysis**

**Falaqeynta Xaaladda Nafaqada Magaalooyinka**

FSNAU waxay qabatay sahamin deg-deg ah ee xaaladda nafaqada, oo ka mid ah sahaminta xaaladda magoolooyinka iyadoo ka sameysay 25 magaalo Soomaaliyeed. Sahamintani waxay darsaysay Wareega Bartamaha Cutudda Sare (MUAC) ee 4511 caruur oo da’doodu u dhexeyso 6 – 59 bilood oo kala yimi 780 qoys, isku dhafka ama dheeli tirnaanta cunta 24 saacadood ee la soo dhaaf iyo qiyaasta xeeladaha ama tabaha qoysku isticmaalo/dabaro marka xaalad adag lagu jiro. Natiijooyinka waxa la barbar dhigay natiijooyinkii ka soo baxay sahamintii la qabtay sannadkii xilligan oo kale (2009). Sahamintani deg-degga ahi ma ah mid matali karta daraasadaha, markaa waa in si taxadar ku jiro loo lafa guraa natiijooyinka sahankan.

Natiijooyinku waxay muujinayaan in magaalooyinka Jawhar (Shabeelaha Dhexe), Ceel Dheer (Galgaduud), Baydhaba (Bay), Burco (Togdheer) iyo Ceel Berde (Bakool) ay ka jiraan nafaqa darro sare (MUAC < 12.5cm). Xaaladda ka jirta Ceel Dheer iyo Ceel Berde waxa inta badan sababay liidasho joogta ah ee sugnaanta cuntada heer qoys. Halka gobolada Bay iyo Shabeelooyinka ay inta badan sababtay cudurro iyo isku dheelli tirnaanta cuntada oo liita. Waxa kale oo walaac la muujiyay magaalooyinka Burco iyo Laascaanood oo sida ay warbixinado sheegayaan ka jirto isku dheelli tirnaanta cuntada oo liidata. Iibsigu waa marinka ugu muhiimsan ee cunto lagu helo, marka laga reebo Buuaale/Saakow oo inta badan cuntadoodu ka timaado waxa ay beertaan iyo *Sako*. Magaalooyinka ay ka jiraan kororka tabaha istabaraadda marka lagu xaalad adag marka loo barbar dhigo sannadkii hore xilligan oo klae (2009) waa Afgooye, Hargeysa, Laascaanood, Ceel Dheer, Ceel Berde, Xuddur, Belet Xawa iyo Xarar Dheere.

## BAADIYAHA

Guud ahaan, xaaladaha sugnaanta cuntada waxay mujisay wax yar oo horumar ah meelo badan oo ka tirsan Soomaaliya, gaar ahaan dhulka ay abaaruhu wax yeelleyeen iyo meelo ka mid ah habnoleleedyada roobabku ku yar yihiin, marka laga reebo gobalada dhexe. Taas waxa keenay roobab u dhexeeya kuwa wanaagsan ilaa kuwa caadi ah oo xilli la’an da’ay intii lagu jiray jilaalkii 2010, kuwaasoo hagaajiyay xaaladaha biyaha iyo daaqa, wax soo saarka xoolaha iyo fursadaha shaqo marka loo eego hawlaha dar darta ku socda ee beraha. Hase yeeshee, tirada (3.2 miliyan qof ) iyo meelaha ay ku sugan yihiin dadka ku sugan xaaladaa ba’an ee bani’aadminimo (HE) iyo dhibaatoyinka hab-nololeedyo (AFLC) ee la qiyaasay dabayaaqadii Dayr 2009/10 isma ayan beddelin. Hab-nololeedyada goobaha ay abaaruhu ku habsadeen ee gobollada dhexe (Mudug, Galgaduud iyo Hiraan) ayaa waxa si daran u u saameeyey xilligii kululaa ee jiilaalkii dheeraa, kaasoo yimid, lix ka dib lix xilli oo is xig xiga oo aan roob la helin oo ay u dheer tahay xoolo badan ay le’day, sicir barar daran, colaado sokeeye iyo suuqyada oo la gaari waayay.

Xaaladaha nafaqo wa mid aad digniin u leh meelo ka mid ahs waxayna in badan kuragtay herarka (xun ilaa kuwa aad u xun) lagasoo bilabo 2009. waxaa taa kaduwan, xaalada sugida cuntada ee xolalayda iyo beero dhaqatada Sanaag iyo Togdheer oo loo aqoonsaday HE intii lagu jiray dabayaqadii Dayr 2009/10 ayaa hagagay, taso ay sababtay hagaga xaaladaha biyaha iyo daaqa, keyntayna inuu hoos udhoco qarashka qoyska uga baxa biyaha, iyo balka oo lasoo gato iyo haajirinta xoolaha, dhinaca kale, waxa kor dhay kharashka ka yimada xoolaha ladhofiyo. Koonfurta, raadka ay ku rebeen roobabkii xilli la’aanta da’ay ee udhexeyay dhexdhexaad ilaa kuwa fiican ayaa barxay sugida cunada wax yar iyagoo kordhiyay qimaha badarka suqyada badankood. Si kastaba ha ahaate, dakhliga qoysaska soo gala ayaa sifican usameyay wax soo sarkii caanaha oo hagagay iyo qimihii musharka ayadoo lahelay fursado shaqo oo badan oo beraha ah Febraayo ilaa Maarso 2010. Bilawgii horaantii Abriil, roobabkii Guga 2010 waxay kabilawdeen qaybo kamid ah waqooyiga, lakiin waqtigas wax lagama shegi karo siduu xilugu noqondoono iyo raadka uu ku reebi doono sugnaanta cuntada.

**Goballada Waqooyi**

Roobabkii dambe ee xayska (Golis iyo xeebta/Guban) iyo roobabkii xilli la’aanta ahaa ee da’ay kuwaasoo u dhexeeyay heerar dhexdhexaad ilaa kuwo wanaagsan intii lagu jiray dabayaqadii bishii Febraayo ilaa horraantii bishii Maarso, waxay raad fiican ku rebeen badanaaba dhulkii xoolo-dhaqatada iyo hab-nololedyada beero-xolodhaqaqda ee Waqooyi. Roobabku waxay dib u buuxiyeen biyo qabatinnada iyo ceelal gacmeedyada waxayna so dadajiyeen in daaqii uu dib u soo kobco. Biyaha oo si aad ah loo helay ka dib, qiimaha biyaha si aad ah ayay hoos ugu dhaceen ayadoo meelaha qaar oo ay roobabku ku badnaayeen biyuhu aysan lacag ku fadhiyin m (beera-xoola dhaqatada Togdheer, banka Sool iyo Sanaag iyo Bari). Hase yeeshee, roobabku waxay raadad xun ku yeesheen Awdal iyo gobalka Waqooyi Galbeed ayagoo keenay daadad intii lagu jiray tobankii bari ee ugu horreeyay ee bishii Maarso, taasina waxay keentay inay xoolo ku dhintaan, waxyeellana gaarsiiyay ilaha biyaha, dhismayaasha dadku ay deggan yihiin hakadna geliyay howlihii ganacsiga. Taas waxaa ka duwan, degmooyinka Hawdkka Sool iyo degmada Eyl (gobolka Nugaal), bartamaha dooxada Nugaal, inta badan dooxada Gebi ee Sanaag iyo dhul-xeebeedyada gobalada Bari iyo Nugaal kuwaasoo wali ah goobo engagan ama kuwo helay roobab aan sii buurneyn.



*Weel Biyoodka Dooxada Dharoor, Iskushuban, Gobolka Bari, March ‘10*

Biya dhamiska ayaa ka socday meelo ka mid ah deegaamadan afartii bilood oo ugu dambaysay, lakiin qiimaha biyuhu hoos buu u dhacay sababtuna waa guud ahaan helitaanka biyaha oo fiicnaaday meelo ka mid ah habnoleledyada la deriska ah iyo fogaantii biyaha loo doonan jiray oo soo gaabatay. Qiimaha biyuhu hoos bay u dheceen deegaamada Awdal, Togdheer iyo Waqooyi Galbeed (ilaa 20-33%) sidoo kale dhulka barkadaha ku tiirsan ee Sanaag iyo gobolka Sool (ilaa 5%) marka loo barbardhigo bishii Disembar ee 2009. Badeeca iswaydaarsiga u dhexeeya ariga iyo badarka (bariis) ayaa tilmaamaya koror gobolka Waqooyi Galbeed (4%), halka uu hoos u dhacay Waqooyi Bari (6%) ilaa iyo bishii Disembar 2009, ayna keentay qiimaha xoolaha oo hoos u dhacay iyo qiimaha badarka oo kor u kacay. Si kastaba ha ahaate, badeeca

iswaydarsiga wali waxuu ka sarreeyaa 27% iyo 45% tii Maarso (fiiri qaybta xoolaha) taa waxaa dheer, natiijadii sugnaanta cuntada iyo nafaqada ee hayadaha badan ka qayb galeen ee laga qabtay qaybta Waqooyi ee gobolka Bari ayadoo muujisay inay wax yar hoos u dhacday dhibaatadii biyaha ka dib markii roobab fiican oo ilaa heer celcelis ah la helay. Waxyaabaha kaloo baarista lagu helay waxa ka mid ah xoolihii horay u qaxay oo dhulka dib ugu soo noqday, iscaawintii bulshada ee qoysaska saboolka oo sii socota intii lagu jiray xilligii xumaa, iyo heerkii nafaqada oo sidiisii sii ahaaday **(heer halis ah).** Marka la eego natiijadii ka soo baxay baaristaa, ee kala qaybinta heerarka sugnaan la'aanta cuntada ee Dayrti 2009/10 ee Waqooyiga Bari (heerka u Dhowaanta Sugnaan La'aan Cunno oo a weheliso qar u saarnaan xaalad Cunno iyo Hab-nololeed Xumo - AFLC) isma ayan beddelin.

**Gobalada Bartamaha (Mudug, Galgaduud iyo Hiraan)**

Xaaladaha sugnaanta cuntada iyo nafaqada ee gobollada dhexe ayaa si joogto ah u sii xumaanysay ilaa Gugii 2007, ayna ugu wacan tahay abaaro dabadheeraaday, barakacayaal badan oo kusoo qaxay dhulkaas, qas ku yimid hawlaha suuqyada oo keenay colaad sokeeye, hawlaha burcad badeednimada oo saameeyay cuntada so dagaysa, qiimaha badarka oo kor ukacay iyo sicir barar. Arrimahaas kor ku xusan ayaa waxa ka dhashay inay yaraadan hantidii hab nololeedka gobolladaas, iyagoo ku khasbay qoysaska inay ku dhaqmaan is debberaad heer xun ah si ay u noolaadaan. Tirada xoolaha, oo ah dakhliga ugu muhiimsan ee hab=-nololeedyada dadka reer guuraaga ee gobollada Bartamaha, ayaa hoos u dhacday intii u dhaxaysay bilihii Jannaayo ilaa Febraayo ee2010. Arritani ayaa waxa sababay dhalidda xoolaha oo xaddidnayd taasoo ka timi hoos u dhac ama jiritaan la'aan rimayga xoolaha ee xilligii wakhtigaa ka horreeyey iyo sido kale xoolo badan oo ay iibiyeen qoysasku si ay u daboolaan baahidooda cunto. Xilligii engegnaa ee jiilaalkii dheeraa ayaa wuxuu sii xummeeyey xaaladaha daaqa iyo biyaha, ayadoo keentay heerka rimida xoolaha oo yaraatay, xaaladaha jirka xoolaha oo walwal ka muuqdo iyo wax soo saarka caanaha oo aan jirinba. Arrimahaas ayaa sababay qulqul joogta ah qoysas badan ee xoolo-dhaqata ah ay ku soo qulqulayaan tulooyinka iyo magaalooyinka ayagoo raadinaya caawimo bani'aadmi.



*Lo' Liidata, Xarardheere, Gobolka Mudug, Maarso '10*

Sidii la soa sheegay intii lagu jiray baaristii Dayrtii 2009/10 ka dib, soo hagaagga beera xoolo-dhaqatada dhulka digirtu ka baxdo iyo hab-nololeedka xool-dhaqatada ee deex xeebeedka waxay keentay inay yaraato guud ahaan dadkii dhibaataysnaa ee Bartamaha (ayaa ka soo yaraaday 76% Deyr 2008/09 gaarayna 70% Deyr 2009/10). Saboolka reer magaalka ayaa wuxuu ka dhigan yahay 15% dadka haatan dhibaataysan. Xitaa haddii roobabka Guga 2010 ay wanaagsanaadaan oo sicir bararkuna uu sii yaraado, dadwaynaha dhibaato ayay ku sii jiri doonaan in muddo ah. Soo kabashada hantida lama-huraanka ahiyo dadaalladaba waxay qadanaysaa helitaanka dhowr xilli oo caadi oo isku daba xiga, sababtuna ay tahay muddadoo dheeraatay iyo darnaanta xaaladaha ba'an ee bani'aadminimo.

**Gobalada Koonfureed**


Xaaladda sugnaanta cuntada ee Koonfurta ilaa heer ayay soo hagaagtay intii lagu jiray Dayrtii la soo dhaafay sababtoo ah xilliga Guga oo ka sarreeya heerarka caadiga ah. Xaaladda ayaa soo hagaagaysay saddexdii bilood ee ugu dambaysay iyadoo xilliga jilaalku uu ahaa mid qabow kaasoo keenay roobab caadi oo ka sarreeya oo heer dhexdhexaad oo ka da'ay goobo badan dhamaadkii bishii Febraayo ilaa horraantii bishii Maarso ee 2010. Roobabkani aa si wanaagsan u saameeyey daaqa, biyaha iyo xaaladaha dallagyada. Biya la'aantii oo yaaratay iyo soo hagaagga daaqa meelo ka mid ah xoolo-dhaqatada, waxay soo kordhisay inuu soo hagaago xaaladaha jirka xoolaha, wax soo saarka caanaha iyo heerka rimida xoolaha, waxayna yareysay guur guurkii xoolaha. Qiimaha ariga waa uu kordhay saddexdii bilood ee ugu dambaysay suuqyada ugu waaweyn ee dhulka masaggada laga soo saaro, marka lagu daro Baladwayne (39%), Luuq (30%) iyo Xudur (11%), halka qiimahasii uu lamid yahay ka ka jira goballada Shabeellooyinka. Hase yeeshee, qiimuhu hoos buu u dhacay in yar gobalada Jubbooyinka (7%) ayna ugu wacan tahay daganaansha la'aan xagga nabadgelyada ah eegobollada Jubbooyinka iyo Muqdisho xilligii xogtan la shaacinayay taasoo xannibaysa isu socodka gaadiidka iyo dadka.



*Koboca Xaaladda Daaqa, Tuulada Lagalaay, Rabdhuurre, Gobolka Bakool, Maarso '10*

Hawlaha beeraha oo xoogaystay xilliga aan caadiga ahayn ee Guga ka horreeyay ee gobollada Jubbooyinka iyo horraantii u diyaar garawga beeridda xillaga Guga ayaa waxay kordhiyeen fursadaha shaqo ee la xiriira beeraha waxayna keeneen inay korodho mushaar hawl maalmeedyada inta badan beera-xoolo dhaqatada iyo dadka ku ag nool wabiyada. Hase yeeshee, kororka mushaar hawl maalmeedyad iyo qiimaha ariga wax badan kuma aysan kordhin awoodda wax iibsiga qoysaska reer guuraaga ee Koonfurta sababtoo ah qiimaha badarka oo sare u kacay. Kororkaas ayaa waxa uu ka yimid hoos u dhac ku yimi dhaqdhaqaaqa firileyda ee suuqyada ka dib s soo saarka dalag ee ee xilligiii Deyr 2009/10 oo hooseeyey gobollada Gedo, Hiiraan, Shabeellada Hoose, Shabeelada Dhexe iyo qaybo ka mid ah Bakool, hakad ku yimid qaybintii cuntada mucaawinada ee la siin jiray barakacayasha ku dhaqan afaafka Afgooye iyo kor u kaca colaadaha sokeeye (Jubbada Hoose, Shabeellada Dhexe iyo Muqdisho) oo waxyeelleeyay isu socodkii ganacsiga. Si kastaba ha ahaate, badeeca iswaydarsiga hoos ayuu u dhacay gobollada Shabeellooyinka, Jubbooyinka iyo Gedo marka la isu eego ariga iyo badarka iyo sidoo kale mushaar hawl maalmeedyada iyo badarka. Taa waxaa ka duwan , badeeca isdhaafsiga oo hagaagay suuqyada kale, marka lagu daro Baydhaba (Baay), Beledweyne, (Hiraan) iyo Xuddur (Bakool) (eeg qaybta Beeraha)

## HAB NOLOLEEYADA SOMAALIYA




*War Saxaafadeedyada soo Baxay iyo Daabacaadaha Jira*

*Warbixinta Xogta Suuqyada ee FSNAU/FEWSNET, Maarso '10*
*Warbixinta Xogta Cimilada ee FSNAU/FEWSNET, Maarso '10*
*Taxanaha Warbixinta Farsamada ee FSNAU Falaqaynta Sugnaanta Cuntada iyo Nafaqada Ka Dib Deyrta 2009/2010, Maarso '10*
*Taxanaha Warbixinta Farsamada ee FSNAU, Falaqaynta Nafaqada Ka Dib Deyrta 2009/2010, Fabraayo '10*

*Xusid: War Saxaafadeedyad iyo Daabacadaha kor ku xusan waxa laga heli karaa Shabakadda (Website) ee FSNAU: www.fsnausomali.org*

Technical & Managerial Support

European Commision

Funding Agencies